



## **Guddiga oo bandhigtay qaab cusub oo loogu talagalay dhageysiga dadweynaha oo ku saabsan miisaaniyadda degmada**

Guddiga Waxbarashada ee Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay soo bandhi doontaa qaab cusub oo lagu qaato jawaab celinta isla markaana looga jawaabo su'aalaha ku saabsan dhaqaalaha degmada iyo nidaamyada iyada oo qayb ka ah nidaamka baaritaanka iyo ansixinta miisaaniyadda 2019-20.

Mas'uuliyiinta PPS waxay miisaaniyadda la soo jeediyay ee 2019-20 Guddiga ugu soo bandhi doonaan kulankooda dhacaya Talaadada, Abriil 23, iyada oo ka dibna qaban doona dhageysiga dadweynaha si loo soo ururiyo jawaab celin ka socota ardayda, waalidiinta iyo bulshada. Kulanka koowaad waxaa la qaban doonaa Talaadada, Abriil 30 isaga oo ka dhacaya Dugsiga Faubion (2930 NE Dekum St.). Dhageysiga, oo socon doona laga bilaabo 6 ilaa 8:30 habeenimo, wuxuu isticmaali doonaa qaab wax la iskugu dhaafsanayo "world café" 10 goobood 'stations' oo kala duwan halkaasi oo mawduucyo kala duwan lagu soo bandhigi doono isla markaana laga wada hadli doono.

Kulanka labaad, ee Talaadada, Maajo 14, waxaa lagu qaban doonaa Qolka Guddiga ee ku yaala xafiiska degmada isaga oo dhacaya laga bilaabo 6-8 habeenimo. Wuxuu isticmaali doonaa mid la mid ah qaabka caadiga ah ee ay xubnaha bulshada ka tirsani ay ku dhiibtaan fikradaha dadweyne.

Kulanka ka dhacaya Faubion wuxuu ku bilaabmi doonaa soo dhaweynta iyo isbarashada Guddiga, ka dibna guudmar ay sameeyaan Kormeerahooda guud Guadalupe Guerrero iyo u-xigeenka Kormeeraha Guud ee Yvonne Curtis iyo Claire Hertz. Shaqaalaha ayaa ka dibna muuqaalka guud ee qaabka jira biririfta dhageysiga ka hor u soo bandhigi doona goobahani 'stations':

1. Dokumentiga miisaaniyadda PPS
2. U doodida maalgelinta dugsiga oo wanaagsan
3. Sinnaanta Dhanka Isirka iyo Cadaaladda Bulshada
4. Horumarinta iyo Hirgelinta Manhajka
5. Xoojinta Nidaamyo Taageero oo Dhinacyo Badan Ka Kooban
6. Taageerada dugsiga ee kala duwan
7. Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ee La Ballaariyay
8. Casriyeynta dugsiga
9. Mawduucyo guud, miisaaniyadda maamulka fulinta iyo xafiiska Guddiga
10. Qaybta faallooyinka dadweynaha, fiidiyaha iyo farriinta

Goobta 2 waxaa ka shaqeynayay Ururka Macallimiinta ee Portland. Goobaha kale 'stations' waxay lahaan doonaan maamulayaasha sare degmooyinka iyo shaqaalaha. Goob kasta waxaa ku jiri doonaa qalabka wax lagu duubo si loogu qabto wada hadalka, iyada waxyaabahan la duubay la siiyo Guddiga si ay uga warqabaan go'aanka ay gaarayaan.

Waxaa jiri doona saddex wareeg oo kulamo ah oo loogu talagalay goob kasta, iyada oo ku bilaabmaysa 5 daqiiqo oo tababar ah, oo ay soo raacdo 20 daqiiqo oo ah wada hadal u dhexeeya shaqaalaha iyo xubnaha bulshada ka tirsan. Ka soo qayb galayaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay booqdaan goobo 'stations' kala duwan, laakiin waa la soo dhaweynayaa in ay sii joogaan hal goob. Turjubaano, cunto/cabitaan fudud iyo daryeel carruureed (oo loogu talagalay carruurta da'doodu tahay 4 iyo ka weyn) ayaa la bixin doonaa.